| Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES | **Foomka Qorshaha Daryeelka Ilmaha Habbeenka ah**<br>**(barnaamijyada xarunta iyo guriga qoyska)**<br>**Overnight Child Care Planning Form (family home and center programs)** |
|---|---|

Bixiyaha waxbarashada xiliga hore ah waa in laga bixiyo dhinaca waaxda si loo bixiyo daryeelka habbeenka ah inta u dhaxaysa sagaalka habbeenimo iyo shanta subaxnimo marka ilmo kasta oo diiwaangashan uu jiifto seddex ama wax ka baddan oo saacado ah barnaamijka.

*Bixiyayaasha waxbarashada xiliga hore ah waxay isticmaali karaan foomkan si ay ugu diyaar garoobaan booqashada goobta rukhsad bixiyaha DCYF si loo baaro u hoggaansanaanta shuruudaha rukhsadaynta daryeelka. In loo soo diro foomkan dhinaca rukhsad bixiyaha waxay kugu caawin kartaa in aad dedejisid hawsha oggolaanshaha.*

| Magaca Bixiyaha: | Aqoonsiga Bixiyaha: | Taariikhda: |
|---|---|---|

Waxaan doonayaa in aan siiyo daryeelka habbeenimo ilmaha ah:

| _____<br>Tirada guud ee carruurta | _____ illaa _____<br>Heerka da' ee carruurta | _____<br>Tirada carruurta ka yar 1 sanno oo da' ah | _____<br>Tirada carruurta da'doodu u dhaxayso 1 iyo 2 sanno oo da' ah |
|---|---|---|---|

Waxaan cusboonaysiiyay dokumeentiyadan soo socda:

- ☐ Qorshaha dhulka (wuxuu aqoonsanayaa meesha rukhsadaysan ee la isticmaalay ee loogu talogalay carruurta seexanaysa ee la siiyo daryeelka habbeenimo)
- ☐ Qaybta buuggyaraha waalidka/mas'uulka ee la cusboonaysiiyay ee ku saabsan daryeelka habbeenkii ah – WAC 110-300-0450(2)(i)(vii)
- ☐ Siyaasada shaqaalaha ee la cusboonaysiiyay (waxay ka hadlaysaa mas'uuliyadaha shaqaalaha ee loogu talogalay daryeelka habbeenimo) – WAC 110-300-0110(2)(i)(vii)
- ☐ Jadwalka maalinlaha ah ee caadiga ah (waxaa kamid ah hawlaha barnaamijka ee daryeelka habbeenimo) – WAC 110-300-0360

**Qalabka Jiifka iyo Sariir Goglida** WAC 110-300-0270(2)(3)

*Bixiyaha waxbarashada xiliga hore ah waa in uu siiyo ilmo kasta sariir gooni ah ama qalab kale oo lagu seexdo midkaas oo:*

- *ammaan ah oona xaaladiisu ay wanaagsantahay;*
- *waana in laga sameeyo qalab dareeraha celinaya midkaas oo la nadiifin karo oona la dhaqi karo;*
- *kasoo baxda baahooyinka koritaanka ilmaha; oona*
- *la keydiyo si meelaha loogu jiifto aanan isku taabanin aan ka ahayn haddii la nadiifiyo oona la dhaqo kadib isticmaal kasta.*

Waxaan isticmaali doonaa qalabka lagu jiifto ee soo socda midkaas oo aan ku seexinayo carruurta ku qoran daryeelka habbeenimo:

*Goglida ilmo kasta sariirtiisa waa in ay noqotaa:*

- *mid saaran go' nadiif ah ama busto si loogu daboolo meesha lagu seexanayo iyo go' nadiif ah oo dusha laga saaro ilmaha aan ka ahayn ilmaha dhallaanka ah;*
- *loo dhaqo si todobaadle ah ama ka baddan haddii uu wasakhoobo. Go' sariir kasta waa in loo dhaqaa si maalinle ah haddii ay isticmaalaan carruur kale; waa in loo*
- *Keydiyaa si gooni ah oo ka baxsan go' sariirta uu isticmaalay ilmo kale, aan ka ahayn in loo nadiifiyo ama loo dhaqo kadib isticmaal kasta.*

Waxaan isticmaali doonaa qorshaha soo socda si aan ugu dhaqo oona ugu keydiyo go' carruurta:

**Horjoogis** WAC 110-300-0270(4)(5)

Shaqaalaha soo socda wuxuu ka taxadari doonaa carruurta inta lagu guda jiro daryeelka habbeenimo:

☐ Shaqaalaha wuxuu ahaan doonaa mid soo jeeda halka carruurta ku jira daryeelka habbeenimo ay hurdayaan; ama

☐ Shaqaalaha wuxuu hurdi doonaa marka carruurta ku jirta daryeelka habbeenimo ay hurdayaan

*Bixiyaha waxbarashada xiliga hore ah midkaas oo hurda marka ay carruurta ku jiraan daryeelka habbeenimo waxaa khasab ku ah:*

- *in ay haystaan oggolaansho qoran iyo dokumeenti caddaynaya in waalidiinta ay ogyihiin in bixiyaha uu hurdayo marka ay carruurtooda ku jiraan daryeelka oona akhriyeen siyaasadaha xarumaha iyo nidaamka hawsha loogu talogalay daryeelka habbeenimo;*
- *soo jeed illaa carruurta oo dhan ay ka seexdaan ama ay dib ugu noqdaan hurdada;*
- *sii joog isla heerka doorka maadaama ay carruurta hurdayaan wakhtiga oo dhan;*
- *seexo isla qolka ay jiifaan ilmaha dhallaanka ah iyo kuwa socod baradka ah;*
- *waa in aad jir ahaan u joogtid oona wax walba ka jawaabtid, diyaar u ahaatid ficil celin dhakhso ah oo aad ku ficil celiso baahooyinka ilmaha;*
- *samayso gambaleelyo si aad usoo kicisid haddii ay khasab tahay in uu ilmo ka tago qolka;*
- *samayso qalab ilaalin kugu caawinaya maqlida oona ula socotid carruurta jiifta qol kasta oo loo isticmaalay jiifka, iyo*
- *usoo kac imaatinka iyo bixida ilmo kasta oo ku jira daryeelka habbeenimo.*

**Dhallaanka ku jira daryeelka habbeenimo** WAC 110-300-0270(4)

☐ Ma lahaan doono dhallaan ku qoran daryeelka habbeenimo.

☐ Waxaan qorshaynayaa in aan dhallaanka ku qoro daryeelka habbeenimo.

*Bixiyaha waxbarashada xiliga hore ah midkaas oo aqbalaya dhallaanka ku jira daryeelka habbeenimo waxaa khasab ku ah in ay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka hurdada ammaanka ah sida waafaqsan WAC 110-300-0291 ee ah ugu yaraan shan iyo tobbanka habbeenimo ee ugu horeeya ee ilmo dhallaan cusub lagu qoro barnaamijkaasi. Bixiyaha wuxuu seexan karaa marka uu dhallaanka hurdayo inta lagu guda jiro daryeelka habbeenimo haddii:*

- *bixiyaha wuxuu sii wadayaa in uu u hoggaansamo WAC 110-300-0291(1)(b), (c), (f), (g), (h), (i) iyo (2);*
- *marka bixiyaha uu noqdo mid la qabsada hawlaha maalinlaha ah ee hurdada iyo calaamadaha dhallaankaasi; oona*
- *Bixiyaha uu oggaaday in aysan jirin wax khatar ah oo ammaanka ama caafimaadka ah oo muuqda marka uu ilmaha hurdayo.*

**Qufulada, Qufulka Albaabka ama Sil-siladaha Ammaanka** WAC 110-300-0270(4)

☐ Ma isticmaali doono qufulada, qufulka albaabka, ama sil-siladaha ammaanka ee lagu xiro albaabada laga baxo inta lagu guda jiro daryeelka habbeenimo.

☐ Waxaan jeclahay in aan isticmaalo qufulada, qufulada albaabka, ama sil-siladaha ammaanka ee lagu xiro albaabada laga baxo inta lagu guda jiro daryeelka habbeenimo. Anigu waan fahansanahay in ay khasab tahay in aan haysto oggolaanshaha DCYF kahor inta aan la isticmaalin midkamid ah qalabyadan.

**Isticmaalka Tuubada musqusha ama Qubeyska** WAC 110-300-0220(2)

☐ Carruurta ku jirta daryeelkayga ee loogu talogalay daryeelka habbeenimo ma isticmaali doonaan tuubada musqusha ama qubeyska; ama

☐ Carruurta ku jirta daryeelkayga ee loogu talogalay daryeelka habbeenimo ma isticmaali doonaan tuubada musqusha ama qubeyska

*Bixiyaha waxbarashada xiliga hore ah waxaa khasab ku ah:*

- *kaliya in uu geliyo musqusha ama qubeyska ilmaha oggolaansho ka haysta dhinaca waalidka ama mas'uulka ilmaha;*
- *in uu hubsado in meesha agagaarka lagu qubaysto ama qubeyska ay tahay mid aan lagu sambariirixoon karin ama lagu sameeyo qalab bir la qabsan karo meesha ah*
- *in uu ka dhigo tuubada qubeyska ama qubeyska mid aan carruuurta geli karin marka aan laga isticmaalaynin dhinaca carruurta (kaliya xarunta barnaamijyada waxbarashada xiliga hore ah)*